## SUURAT ASH-SHAMS:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

1. ***Eebe wuxuu ku dhaartay qorraxda iyo barqinkeeda***
2. ***Iyo dayuxu markuu qorraxda raaco***
3. ***Iyo maalintu markay ifiso***
4. ***Iyo habeenku markuu daboolo ( madoobaado )***
5. ***Iyo samada iyo say u dhisan tahay***
6. ***Iyo dhulka iyo suu u fidsan yahay***
7. ***Iyo nafta iyo sida Eebe u ekeeyay***
8. ***Una tusiyay jidka xun iyo ka Eebe ka yaabiddaba***
9. ***Ee waxaa liibaanay ruuxii naftiisa daahiriya***
10. ***Waxaana khasaaray ruuxii naftiisa xumaan dhex galiya***
11. ***Thamuud waxay beeniyeen ( xaqii ) kibir dartiis***
12. ***Markuu tagay koodii xumaa ( si uu hasha u dilo )***
13. ***Oo Rasuulkii Eebana ku yidhi, iska daaya Hasha Eebe iyo cabbideeda***
14. ***Wayna beeniyeen Rasuulkii Hashiina way dileen markaasaa Eebe si daran u caddibay dambigooda dartiis***
15. ***Isagoon Eebe ka yaabaynin cidhib ( iyo wax yeello )***

Qur'an 91:1-15

***Sharaxa Suuradaan:***
Eebe wuxuu ku dhaartay todobo arrimood oo suuraddan ka mid ah,

in ruuxii xaqa ku toosnaada uu liibaani, kii jidka xun qaadana uu khasaari, isla waynida dambiga, iyo xaq-diidnimaduna sabab u noqoto halaag iyo ciqaab. Rasuulkuna wuxuu yidhii " Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee": Ruux kasto oo la dhalo waxaa lagu dhalaa Fidrada ( Islaamka ). Waxaa kale oo uu dhihi jiray isagoo sujuudsan: Eebow sii naftayda cabsideeda, daahirna yeel adaa u khayr badan ku wax daahiriyee, adigaa weli u ah Sayidkeedana ah.

Waxaa wariyay Imaam Axmed